**Unofficial translation**

# War saxaafadeed

**12 June 2013**

Maanta, Gudiga Midowga Yurub u qaabilsan Siyaasadda iyo nabadgelyada (EU PSC), oo ah kan gacanta ka geysta qeexidda iyo kormeeridda ka jawaabidda Midowga Yurub ee xasaradaha taasoo ka mid ah Siyaasadda loo dhan yahay ee arrimaha Dibada iyo Nabadgelyada ee Midowga Yurub, ayaa booqashiisa ugu horeysay ku tegay Soomaaliya. Booqashadu waxay muujisay sida Midowga Yurub ugu heelan yahay hanaanka siyaasadeed ee cusub iyo dadka Soomaaliya iyo taagyeerada baaxadda leh ee caadiyeynta xaaladda Soomaaliya siyaasad ahaan iyo nabadgelyo ahaan labadaba.

Safiirada EUPSC waxay la kulmeen Madaxweyne Xasan Sheikh Maxamuud iyo Dowladda Federaalka. Waxay soo dhaweeyeen horumarka laga gaaray howlaha siyaasadda, dib-u-heshiisiinta iyo xagga nabadgelyada iyo horumarinta iyadoo ay ka wada hadleen dhibaatooyinka weli hortaan dowladda sidi dalka dib loogu dhisi lahaa. EU PSC waxay ku noox-nooxsadeen taagyeerada joogtada ah ee Midowga Yurub si looga abuura Soomaaliya nabad, xasilooni iyo barwaaqo iyo guud ahaan gobolka Geeska. Waxay dhiirigeliyeen sii wadida adkaynta guulaha laga gaaray nabadda iyo dowladnimada. Madaxweynaha iyo Safiirada EU PSC waxay hoosta ka xariigeen in "Shirka ku saabsan Heshiiska Cusub ee Soomaaliya" ee ay si wada jir ah u marti gelin doonaan Soomaaliya iyo Midowga Yurub kana dhici doona Brussels bisha Setember ee sannadkan, wuxuu noqon doonaa fursad qaali ah oo lagu boorin doono bulshada caalamka in ay is-babar taagto Heshiiska Cusub iyo aragtida Dowladda ee ilaa 2016.

Wakiilada EU PSC waxay kaloo booqdeen Ergada Midowga Yurub ee Tababaridda (EUTM) taaasoo dhawaan laga soo raray Uganda loona soo raray Soomaaliya.

Nabadgelyada waxay ahaanaysaa dhinac muhiin ka ah xasiloonidda Soomaaliya iyadoo u soo raridda howlaha EUTM Muqdisho ay qayb ka tahay tusaale muujinaaya is-bedelka ka howl gelidda gudaha Soomaaliya iyo iskaashi dhaw ee lala yeelanaayo maamulada.

**Faafaahin**

PSC waa qaab-dhismeed joogta ah ee Golaha Midowga Yurub kana ciyaara kaalin udub dhexaad ah qeexidda iyo dabagalka jawaab-celinta Midowga Yurub eek u aadan xasaradaha. Wuxuu kaloo gacan ka geystaa diyaarinta iyo fulinta siyaasadda loo dhan yahay ee arrimaha Dibadda iyo Nabadgelyada (CFSP) iyo Siyaasadda loo dhan yahay ee Nabadgelyadda iyo Difaaca (CSDP). Gaar ahaan, wuxuu qeexaa uuna daba galaa ka jawaabidda Midowga Yurub marki ay jirto xaalad xasarad ah. PSC waxaa si joogta ah u shir-gudoomiya Waaxda fal-galka Dibadda ee Yurub waxaana ku jira safiirada 27da dowladood ee xubnaha ka ah Midowga Yurub.